

XAQIIQOOYINKA KU SAABSAN CUNTADA AASAASIGA AH



Miyaa aniga oo shaqeynaya weli qaadan karaa Cuntada Aasaasiga ah?

Haa. Qoyskaaga ayaa wuxuu heli karaa dakhli gaaraya ilaa 200% ee Dhabbe-tusayaasha Saboolnimada Federaalka wuxuunna xaq-u-yeelan karaa Cuntada Aasaasiga ah.

Dadka Reerka Ka Tirsan Xadka Dakhliga Bil Kasta*

1	\$2,510
2	\$3,407
3	\$4,303
4	\$5,200
5	\$6,097

*Qaddarada waxaa la cusboonaysiiyaa Abriil kasta

Ma in aan carruur haystaa si aan xaq ugu yeesho?

Maya. Qoysaska inta ay doonaanba ha la ekaadaan waxaa ay xaq-u-yeelan karaan in ay helaan Cuntada Aasaasiga ah.

Ka waran dadka kale ee aniga iigaga baahi badan?

Ma xaddidna tirada dadka xaq u leh ee qaadan kara Cuntada Aasaasiga ah. Helidda Cuntada Aasaasiga ah ee loogu talagalay adiga iyo qoyskaagaba ma saameyn doonto awoodda uu qof kastoo kale u leeyahay in uu helo dheefahan.

Ma in aan noqdaa Muwaadin Maraykanka u dhashay?

Maya. Qaar ka mid ah muhaajiriinta aan sharciga haysan ee ka soo baxa xeerarka barnaamijka gaarka ah waxay xaq u yeellan karaan dheefaha cuntada.

Helidda dheefaha Cuntada Aasaasiga ah ma saameyn doonto xaaladda socdaalka ee Adeegga Socdaalka iyo Jinsiyadda ee Mareykanka.

Miyaan xaq u yeelan karaa aniga oo weli leh gaari iyo guri?

Haa. Haddii qoyskaagu uu leeyahay dakhli dhaca gudaha xadadka dakhliga barnaamijka, kheyraadyo kasta oo kale sida gawaarida, xisaabaha hawlgabka, gurigaaga iyo hantda kale lama tixgeliyo.

Ma in aan xafiis tagaa si aan u codsado?

Maya. Waxaad ka codsan kartaa barta Internet-ka washingtonconnection.org ama lambarkan telefoonka 877-501-2233, ayaad ka codsan kartaa adigoo aan gudbin codsi ama Xafiiska Adeegga Bulshada ee kuugu dhow. Ka hel CSO ugu dhow dshs.wa.gov/office-locations.

Fakis: 888-338-7410

Cinwaanka boostada:

DSHS Customer Service Contact Center

P.O. Box 11699

Tacoma, WA 98411-6699

Waa maxay nooca waraaqaha loo baahan yahay in aan keenno?

Waxaad u baahan tahay in aan inna siiso lambarkaaga Dammaanada Bulshada, caddeynta aqoonsigaaga iyo caddeynta dakhliga iyo kharashaadka nololeed ee reerkaaga. Haddii loo baahdo, waxaan kaa caawin karnaa in aad hesho macluumaadka loo baahan yahay.

Dadka qaarkood waxay keliya helaan \$23 bishii. Xitaa ma mudan yahay in la codsado?

Dadka qaar waxaa ay qaataan dheefta bilaha ugu yar ee qoysaska halka qof ama labada qof, oo ah \$23. Dadka qaata qaddarka ugu yar inta badan waxaa ay kaydsadaan dheefaha dhowr bilood si ay ugu bixiyaan kharashka marka ay tagaan dukaanka raashiinka. Qaar kale waxaa ay dheefaha u adeegsadaan in ay ku soo darsadaan miro iyo khudaar daray ah miisaaniyadooda cuntada.

Dadka intooda badan waxaa ay helaan dheefo bille ah oo intaa ka badan.

Si aad u hesho qiyaasta dheefaha billaha ah ee aad heli karto, si bilaash ah nooga soo wac **877-501-2233** ama booqo mareegtadeenna ah washingtonconnection.org.

Ma jiraan dheefo dheeraad ah oo ay leedahay helidda Cuntada Aasaasiga ah?

Marka aad hesho Cuntada Aasaasiga ah, waxaad xaq-u-yeelan kartaa barnaamijyo kale, sida:

- Barnaamijka raashiinka iskuulka ee qiimaha-jaban ama bilaashka ah.
- Barnaamijka nafaqada gaarka ah ee loogu talagalay Haweenka, Ilmaha yaryar iyo Carruurta.

Miyaan heli karaa caawimaad tababar ama mid shaqo helid?

- Haa! Haddii aad qaadato Cuntada Aasaasiga ah, waxaad si iskaaga wax-u-qabso ah ugu qaybqaadan kartaa Barnaamijka Tababbarka iyo Shaqada ee Cuntada Aasaasiga ah.
- Barnaamijka BFET wuxuu bixiyaa shaqo-raadin, tababar shaqo raadin, adeegyo waxbarasho, tababar xirfadeed, iyo fursado shaqo kale oo loogu talagalay dadka qaata Cuntada Aasaasiga ah.

Uurro faro badan ayaa bixiya caawimaadda gaadiidka, daryeelka carruurta ama kheyraad kale oo kugu caawin kara in aad ka shaqeyso yoolalkaaga shaqo. Adeegyada ayaa la bixiyaa iyada oo loo marayo kuleejyada farsamada ama bulshada iyo/ama ururro ku saleysan bulshada waxaa ayna bixiyaan xirfado shaqo iyo qaybo shaqo badan oo kala duwan. Haddii aad rabto macluumaad ku saabsan adeegyada BFET, booqo mareegtada dshs.wa.gov/BFET.

Haddii la ansixiyo, muddo intee le'eg ayay qaadan doontaa in aan helo dheefahayga?

- Celcelis ahaan, waxaan ku oggolaanaa codsiyada qoysaska xaqa u leh qiyaastii laba toddobaad gudahooda.
- Ku dhowaad kala-bar dhammaan codsiyada waxaa lagu ansixiyaa in ka yar lix maalmood gudahooda.
- Marka aan ansixino codsiga Cuntada Aasaasiga ah, dheefaha waxaa ay dib ugu noqonayaan taariikhda codsiga.

Hay'adan waxay bixisaa fursad loo siman yahay.



Transforming lives

DSHS 22-1302 SM (Rev. 4/24)
Somali

Wixii macluumaad dheeraad ah:

1-877-501-2233
washingtonconnection.org